

**BLUEPRINT FOR ENGLISH LANGUAGE LEARNERS (ELLS) SUCCESS****QORSHAHA LOOGU TALOGALAY GUUSHA ARDAYDA BARATA LUUQADA INGIRIISKA (ELLS)**

Hawlgalka Xafiiska Waxbarashada Labada Luuqadood iyo Daraasadaha Luuqadda Qalaad (OBE-WL) ee Waaxda Waxbarashada Gobolka New York (NYSED) waa in Lahubiyo in dhammaan ardayda Gobolka New York (NYS), oo ay ka mid yihiin Ardaya Barata Luuqadda Ingiriiska (ELLS), in ay gaaraan heerka ugu sareeya ee guusha tacliimeed iyo luuqad aqoonista. Waxaynu ku dadaalnaa hubinta in dhammaan dariiqyada waxbarashada shakhsiyeed iyo baahiyada shucuurta bulshadeed ee ardayda in lagu gaaro luuqado badan oo u horseedaya u diyaarsanaanta kulliyad iyo shaqo xirfadeed. NYSED waxay aaminsan tahay in dhammaan macalimiinta ay yihiin macalimiinta ardayda ELLs.

Ayadoo ka jawaabaysa isbedelka dhaqaalaha adduunka, NYSED waxay qaadatay Heerarka Waxbarashada Manhajka Midaysan (CCLS) si ay u siiso ardayda, bareyaasha, iyo waalidiinta filashoojin go'an oo qeexan oo u horseedaya u diyaarsanaanta kulliyad iyo shaqo xirfadeed. Tobankii sannadood ee la soo dhaafey, waxaa jiray kordhac ku yimid tirada ardayda ELLs ee ku qoran dugsiyada dadweynaha gobolka New York (NYS) oo sababtay in ay hadda jiraa arday tiradooda gaaraysa 214,378 oo ku hadla in ka badan 160 luuqadood. Si ay ardaydan u guuleystaan, NYSED waxay u baahan tahay in ay siiso dugsiyada mambaro ku habboon, qiimeynta afka hooyo iyo macluumaad sidaas awgeed macalimiinta waxay bixin karaan waxbarid awood u siinaysa ardayda in ay gaaraan heerar aad u ad-adag. Ayadoo la hoostagaya Sharciyada Wakiilkha Hay'adeed ee Waxbarashada Qaybta 154, OBE-WL wuxuu xaqiijinayaa in aan la oggolayn in ay u qaataan dhixgelidda aan la taageerin ee arday ELLs ay soo dhixgaliyaan jawiga luuqadda Ingiriiska loogu hadla in ay awood u siinayso in tacliin ahaan ay guulaystaa.

Heerarka Waxbarashada Manhajka Midaysan (CCLS) ee P-12 ee NYSED waxay u baahan yihiin in macalin kasta uu diyaar u noqdo in uu baro luuqad tacliimeed iyo maado adag dhammaan ardayda, oo ay ka mid yihiin ardayda ELLs. Dhammaan macalimiinta waa in ay xirfad u lahaadaan sida loo taageero ardayda ELLs ee u baahan kororsanayaan aqoonta maadada inta ay u horumarayaan dhanka aqoonista luuqadda Ingiriiska. Waa wax muhiim ah in dhammaan bareyaasha ay ka shaqeeyaan guud ahaan maadooyinka si ay u hubsadaan in dhammaan ardayda ay gaaraan dalabyada badan ee CCLS.

Mabaadii'da soo socota waxaa loo sameeyay si taxadar badan leh si qaab-dhismeed gobolka oo dhan ah oo looga gol leeyahay in lagu cadeeyo filashoojinka maamuleyaasha, siyaasad-dejiyeysaasha, iyo xirfadleyaasha si ay ugu diyaariyaan ardayda ELLs guul, ayadoo laga bilaabaya dugsi-horaadka xannaanada carruurta, si ay u dhigaan aas-aaska u diyaarsanaanta kulliyad iyo shaqo xirfadeed. Mabaadii'dan waxaa loogu talogalay in lagu siiyo huggaan, macluumaad, iyo taageero dugsiyada degmooyinka, iyo macalimiinta, sidoo kale si loogu qaado fahanka wanaagsan iyo qaddarinta Waxbarashada Labada Luuqadood, Ingiriiska Sida Luuqadda Labaad Ahaan, iyo Daraasadaha Luuqadda Qalaad.



BLUEPRINT FOR ENGLISH LANGUAGE LEARNERS (ELLS) SUCCESS

QORSHABA LOOGU TALOGALAY GUUSHA ARDAYDA BARATA LUUQADA INGIRIISKA (ELLS)

Mabaadii'da hagga Qorshaha loogu talogalay ardayda ELLs waa:

1. Dhammaan macalamiinta waa macalamiinta Ardayda Barata Luuqada Ingiriiska, waxayna u baahan yihiin in ay qorshaystaan sida ku habboon ayagoo:

- Qaabeynaya kadibna bixinaya waxbarid dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan ku habboom **dhammaan** ardayda kala duwan, oo ay ku jiraan kuwa leh Barnaamjiyada Waxbarasho ee Shakhsiyadeed (IEP).
- Bixinaya waxbarid luuqadda iyo maadada ee isku dhafan si ay u taageeraan horumarka luuqadda ayadoo loo marayo mambaro luuqadda-diirad saaraya. Macalamiinta labada luuqadood, Ingiriiska Sida Luuqadda Labaad ahaan (ESL) iyo maadooyinka kale waa in ay uga wadashaqeeyaan si ujeeddo leh oo joogto ah si ay sare ugu qaadaan guusha tacliimeed ee dhammaan maadooyinka.
- Ka faa'iideysanaya maduumaadka iyo Qalabka waxbarista ee luuqad ahaan, da'fasal ahaan ku habboon, kuna toosan Heerarka Waxbarashada Manhajka Midaysan (CCLS).
- La shaqeynaya hawladeenka taageero ee dugsiga iyo khayraadka aadanaha ee bulshada ku dhisan si wax looga qabo baahiyada badan ee ardayda ELLs.

2. Dhammaan guddiyada dugsiga iyo hoggaamiyeeyasha degmada/dugsiga waxay mas'uul ka yihiin hubinta in baahiyada shucuureed, bulshadeed, luuqadeed iyo tacliimeed ee ardayda ELLs in wax laga qabtay ayagoo:

- Bixinaya aragtida qeexan ee guusha ardayga ee ka mid ah filashooyin sare ee loogu talogalay guulgaaridda ardayga ELL iyo horumarka shucuurtu bulshadeed, ee taageera qorshaha tallaabo ee ujeeddada leh ee bixiya dariiqooyin badan ee lagu gaaro u diyaarsanaanta kulliyad iyo xirfadda shaqo ayadoo loo marayo barnaamijyo qiimo sare leh ee buuxiya baahiyada ardayda ELLs.
- Bixinaya wabarist qiiimo-sare leh ee loogu talogalay ardayda ELLs.
- Toosinaya kadibna isku dubaridaya khayraadka maaliyadeed iyo kharyaadka aadanaha si loo hubiyo in qorshaha waxbaridda si wax ku ool ah loo hirgeliyay.
- Siinayo taageero qiiimo-sare leh, jawaabcelin iyo jihayn bareyaasha si ay sare ugu qaadaan hababkooda wabarista.
- Bixinaya jawi waxbarasho loo wada dhan yahay oo ammaan ee aqoonsanaya kadibna xushmeyana luuqadaha iyo dhaqamada dhammaan ardayda.
- Hubinaya in hoggaamiyeeyasha degmooyinka iyo dugsiga ay u tababaran yihiin buuxinta baahiyada ardayda ELLs si loo horumariyo dhaqanka dugsiga ee filashooyinka sare.
- Siinaya adeegyo taageero iyo mid waxbarisho qiiimo-sare leh ardayda ELLs ee naafonimada leh ayadoo lagu toosinaya Barnaamijkooda Warbarashada Shakhsiyeed (IEPs) iyo siyaasadaha hadda jira.



BLUEPRINT FOR ENGLISH LANGUAGE LEARNERS (ELLS) SUCCESS

QORSHABA LOOGU TALOGALAY GUUSHA ARDAYDA BARATA LUUQADA INGIRIISKA (ELLS)

3. Degmooyinka iyo dugsiyada waxay ka qaybgelinayaan dhammaan Ardayda Barata Luuqadda Ingiriiska waxbarasho fasaleed ku habboon, tacliin ahaan ad-adag, kuna toosan Aas-aaska Dugsi-horaadka Xannaanada Caruruut ee loogu talogalay Manhajka Midaysan iyo Heerarka Waxbarashada Manhajka Midaysan ee P- 12 ayagoo:

- Si cad u sheegayo ujeeddooyinka luuqadda iyo maadada gaarka ah.
- Isku dhafaya waxbarista maldahan iyo midda waadaxa ah ee ereyada micneysan ee cilmi-baarista ku saleysan.
- Bixinaya fursado loogu talogalay ardayda si loogu wadahadalo maado iyo si ay ula xaliyaansu'aalada facooda.
- Dhidbaya waxbarista iyadoo si xeeladeysan loo adeegsanayo hab-dhaqannada cilmi-baarista ku saleysan (tusaale ahaan, wax si kasta wax u soo gudbiya, muuqalo, habeeyeyaasha garaafka, iwm.)
- Bixinaya taageero waxbarasho gaar ah, adeegyo, diyaarin iyo waxbaris si gaar ah loo qaabeeeyay si loo buuxiyo baahiyada gaarka ah ee waxbarasho ee ardayda ELLs ee naafonimada leh.
- Qaabeynaya, xulaya, kadibna hirgelinaya manhajka qiiimaha-sare leh ee buuxiya baahiyada *Waxbarashada Wakhtiga Hore ee ardayda ELLs, eena taageerta Ururka Dugsi-Horaadka Xannaanada Caruruut ee New York ee loogu talogalay manhajka Midaysan,*
<http://www.p12.nysesd.gov/ciai/commoncorestandards/pdfdocs/nyslsprek.pdf>.
- Adeegsanaya luuqad tacliimeed iyo taageerada maadooyinka la barto ayagoo si xeeladeysan **ula socodsiinaya ardayda ELLs horumarinta luuqadda si sii socota ayadoo laga faa'iideysanaya Horusocodyada Manhajka Midaysan ee Labada Luuqadood ee Gobolka New York,**
<http://www.enqaqeny.org/resource/new-york-state-bilingual-common-core-initiative>

4. Degmooyinka iyo dugsiyada waxay aqoonsan yihiin in labo luuqadood yaqaanidda iyo labo luuqadood qoridda iyo akhrinta in ay yihiin raasumaal, iyo in ay siyyaan dhammaan ardayda si ay u kasbadaan abaalmarinta Aqoonsiga qoranika laba luuqadood marka uu qaato dibloomaha dugsiga sare ayadoo la siinayo dhammaan ardayda: labid

- Fursado ay kaga qaybqaadanayaan barnaamijyada taageerada luuqadeed ama barashada luuqadeed ee horseedaya aqoonista Ingiriiska iyo luuqado kale.
- Fursado lagu adeegsanayo laguna horumarinayo luuqadda tacliimeed iyo aqoonta maadooyinka labaduba luuqadda Ingiriiska iyo luuqad kale oo aan ahayn Ingiriis, oo ay ka mid tahay afka hooyo ee ardayga.
- Barnaamijyada Wab rashada Labada Luuqadood ee ad-adag ee loogu talogalay ardayda ELLs ee ujeeddadoodu yahay sii-wadidda iyo horumarinta afka hooyo iyo sidoo kale gaaridda aqoonista luuqadda Ingiriiska sidoo kale akhrinta iyo qorista labada luuqadood.
- Dariiqooyinka bedelka ah ee loogu talogalay ardayda afkooda hooyo ay tahay mid aan ku jirin Barnaamijka Waxbarashada Labada Luuqadood ee degmo ayadoo ay sabab u tahay dhacdeda luuqadda oo hooseysa.



BLUEPRINT FOR ENGLISH LANGUAGE LEARNERS (ELLS) SUCCESS

QORSHABA LOOGU TALOGALAY GUUSHA ARDAYDA BARATA LUUQADA INGIRIISKA (ELLS)

5. Degmooyinka iyo dugsiyada waxay u qiimeeyaan dhammaan waalidiinta iyo qoysaska ardayda ELLs sida shuraakada waxbarashada waxayna si wax ku ool ah ugu qaybgeliyan waxbarashada caruurtooda ayagoo:

- Siinaya waalidiinta maclumaad awood u siinaya in way ka warahayaan go'aanada ku saabsan waxbarashada caruurtooda.
- Siinaya waalidiinta dhammaan maclumaadka la xiriira ee ku saabsan xaqquqadhooda iyo ikhtyaarada barnamijka luuqadda iyo qaab waalidiinta ay si fudud ugu fahmi karaan ayna u heli karaan.
- Siinaya tababar waalidiinta oo ku baxaya Luuqadda Ingiriiska iyo afkooda hooyo si qorsheenta wax ku ool ah si ay u taageeraan waxbarashada caruurtooda ee gudaha dugsiga iyo dibadiisaba.
- Uga qaybgelinaya waalidiina sida ka qaybqaateyaal firfircooni, tabarruceyeyaa iyo xiriiriyeeyaa dhaqanka ee bulshada dugsiga.
- La wadaagaya waalidiinta iyo xubnaha qoyska filashooyinka sare ee dugsiyada u dejyeen waxbarashada dhammaan ardayda ELLs iyo ka qaybgelinta ayaga laga qaybgelinaya ku raadjoogidda iyo ka guulgaaridda filashooyinkaasi.
- La shaqaynaya hawladeenka taageerada dugsiga iyo ururada ku dhisan bulshada muhaajiriinta ah si wax looga qabo baahiyada badan ee qoysaska ardayda ELLs.

6. Bulshooyinka dugsiga iyo degmada waxay ka faa'iideyaan in ay kasbadaan khibradda Labada Luuqadood, ESL, iyo macalimiinta Luuqadaha Kale ee Aan Ahayn Ingiriiska (LOTE) iyo hawladeennada taageero ayagoo kordhinaya awoodooda xirfadeed ayagoo:

- Abuuraya fursado waxbarasho oo bareer ah ee loogu talogalay dhammaan macalamiinta si ay uga wadashaqeeyaan ayna u qaabeeyaan waxbaridda, ay u falanqeeyaan shaqada ardayga, ayna u sameeyaan casharo ad-adag.
- Bixinaya fursado xoog leh oo waara ee loogu talogalay dhammaan macalimiinta in ay kaga qaybgalaan horumarka xirafadeed ee macnaha weyn ku fadhiya ee wax ka qabta baahiyada ardayda ELLs, oo ay ka mid yihiin horumarinta afka hooyo iyo luuqadda cusub.

7. Degmooyinka iyo bulshooyinka dugsiga waxay ka faa'iidaystaan afka hooyo ee ardayda ELLs, raasumaalka dhaqanka, iyo aqoonta hore ayagoo:

- U qaddarinaya afka hooyo sida raasumaal waxbaris, iyo ayagoo u adeegsanaya isku xirka aqoonta hore iyo aqoonta cusub ayadoo la hubsanayo in maadada ay tahay mid macno weyn ku fadhida oo la fahmi karo.
- U adeegsanaya afka hooyo iyo dhaqamada ardayda ELLs in sare loogu qaado kala duwanaanshaha ayadoo la raacayo Xeerka Sharafta Dhammaan Ardayda (Hindisaha NYS, dhaqangal ah Luulyo 2013), <http://www.p12.nysed.gov/dignityact/>.



BLUEPRINT FOR ENGLISH LANGUAGE LEARNERS (ELLs) SUCCESS

QORSHABA LOOGU TALOGALAY GUUSHA ARDAYDA BARATA LUUQADA INGIRIISKA (ELLs)

8. Degmooyinka iyo dugsiyada waxay adeegsadaan qalabyo lagu oggaanayo iyo hab-dhaqanno qiimeyn socota si loo cabbiro aqoonta maado ee ardayda ELLs' sidoo kale horumarka afka hooyo iyo luuqadda cusub si loogu wargeliyo waxbarista ayagoo:

- Adeegsanaya qiimeynta Gobolka oo lala kaashanaya qiimeyn ogaashada.
- Adeegsanaya xogta aqoonista luuqad ee Gobolka (oo laga helo Imtixaanka Ka Guulgaaridda Luuqadda Ingiriiska sida Luuqadda Labaad ahaan ee Gobolka New York [NYSESLAT] iyo Imtixaanka Aqoonsiga ee Gobolka New York ee loogu talogalay Ardayda Barata Luuqadda Ingiriiska [NYSITELL]) si loo fahmo halka ardayda ELLs ay isla socdaan horumarka luuqadda ee socda, iyo si loo siiyo mambaro habboon ayadoo la eegaya heerkooda aqoonista.
- Shaqaaleynaayo qiimeyn sax ah oo lagu kalsoonaan karo ee u baahan adeegsiyada habka-sare ee luuqadda ku jirta maadada xambaarsan wax badan oo sax ah ee lagu kalsoonaan karo .
- Ka faa'iideysanaya qalabyada ku habboon si loo qiimeeyo baahiyada iyo horumarka ardayda ELLs ee naafonimada leh.
- Ka faa'iideysanaya tilmaan-bixinada lafoguridda ee ka bixiya jawaab-celin aqoonta maadada iyo horumarinta luuqadda.
- Adeegsanaya qiimeynta afka hooyo si loogu wargeliyo waxbaridda looguna muujiyo kobaca barnaamijyada Waxbarashada Labada Luuqadood ee lagu adeegsaday afka hooyo.